

## U baahan kaalmo kiro?

Barnaamijka Kaalmada Kirada iyo Kahortagga Guri-ka-saarista ee King County (Eviction Prevention and Rent Assistance Program {EPRAP}) wuxuu ka caawiyaa kireystayaasha la daahsan lacagaha kirada iyo qarashyada guriga, culeysyada COVID-19 awgood.

### King County ma aqbalayo arjiyo cusub oo kaalmada kirada loogu talagalay wixii ka dambeeya Feebaraayo 28, 2022.

Fadlan wac 211 si laguugu xiro hay'adaha King County oo dhan kuwaasoo laga yaabo weli inay hayaan kheyraad kaalmo kiro.

## Ka warran haddaan horey isku diiwaangeliyay?

Hadaad isku diiwaangelisay Barnaamijka Kaalmada Kirada iyo Kahortagga Guri-ka-saarista ee King County (EPRAP) ka hor Feebaraayo 28'da, 2022 ayadoo la isticmaalayo barta kireystaha ee boggeena khadka, waxaa weli jiri kara suurto galnimada in lagaa soo xulan doono liiska kooxda kireystaha si aad u heshid kaalmo. Isbuuc kasta, King County wuxuu si bakhtiyonasiib ah uga xushaa liiska kireystaha kireystayaal horey isku diiwaangeliyay si ay barnaamijka uga qeybqaataan. Tirada la xusho wey isbedbedeshaa ayadoo ku saleysan awoodda adeeg bixiyeyaasha. Arjileyaasha jira wey sii wadi karaan in ay galaan khadka kireystaha si ay u helaan warbixin xaalad.

### King County EPRAP wuxuu hayaa dhaqaale xadidan. Nasiibdarro, ma awoodi doono in aan caawinno qof-kasta oo is-diiwaangeliya.

Waan sii wadi doonaa in aan kuula soo xidhiidhno oo aan kugu wargelino hormarkeena. Fadlan fiirso iimeelkaaga kana jawaab wicitaanno iyo qoraallo foon oo ka imaada lambar la garaneyn, maadaama aad weli ka mid noqon kartid qoysaska loo xusho kaalmo.

## Waa maxay Heshiiska Lacag-bixinta EPRAP?

Sida ay qeyb uga tahay helidda lacagaha kirada ee Barnaamijka Kaalmada Kirada iyo Kahortagga Guri-ka-saarista ee King County (EPRAP), mulkiilaha wuxuu saxiixay Heshiiska Lacag-bixinta (sidoo kale loo dhaho T-RAP form). Dhokumentigaan waxaa ku jira macluumaadka ku saabsan bilaha EPRAP kiradaada bixisay (muddada lacag-bixinta) iyo qodobbada iyo sharuudaha mulkiiluhu aqbalay, sida:

- In kirada lagu siyaadin ama guriga laga saarin kiro bixin la'aan awgeed ilaa 6 bilood ah kadib muddada lacag-bixinta
- In aan lagu dallacin lacago kiro la-daahis awgeed ama ganaaxyo dheeri ah xagga muddada lacag-bixinta

### Heshiiska mulkiiluhu saxiixay wuxuu ku jiraa Barta EPRAP, kaasoo [halkaan](#) aad ka heli kartid.

Haddii aad u baahantahay caawimaad helitaanka warqadahaan, waxaad iimeel-gareyn kartaa [DCHSrentalassistance@kingcounty.gov](mailto:DCHSrentalassistance@kingcounty.gov) ama wac 206.263.3481

## U baahan kaalmo sharciyeed oo la xiriirta guri-ka-saarista?

Haddii aad sugeysid kaalmo kiro ku jirta Liiska Kireystaha iyo haddiikalaba ama hadda ku jirtid buraseyska warqado gaarsiinta oo mulkiilahaagu ku siiyay ogeysiiska guri-ka-saarista, caawimaad waa diyaar.

### Kahor intaadan go'aamo ka gaarin inaad ka baxdo gurigaaga ama aqbasho qorshe lacag-bixin, ka ogow [washingtonlawhelp.org](http://washingtonlawhelp.org) macluumaad ku saabsan xaquuqdaada iyo sida hannaanka guri-ka-saarista u shaqeyo.

Wixii su'aalaa iyo macluumaad guud oo ku saabsan **xaquuqaadka kireystaha**, ka wac [Solid Ground's Tenant Services](http://Solid Ground's Tenant Services) Khadka Farriimaha 206-694-6767 ama Ururka Kireystayaasha ([Tenants Union of Washington State](http://Tenants Union of Washington State)) khadkooda 206-723-0500 ama iskuday [tenantsunion.org](http://tenantsunion.org).

Haddii aad ku hesho Seattle **ogeysiiska bixi-ama-banneeh**, ka wac magaalada Seattle Khadka Caawinta ee Kireynta 206-684-5700 si aad u hubisid inuu yahay ogeysiis sax ah. The [Eastside Legal Assistance Program](http://Eastside Legal Assistance Program) wuxuu sidookale

kireystayaasha siiyaa caawin sharciyeed. Khadka ka dalbo ama wac khadkooda caawinta: 425-747-7274 (Ingiriis) 425-620-2778 (Isbaanish). Kireystayaasha waxay sidookale caawin ka dooni karaan [Tenant Law Center](#): 206-324-6890.

Haddii aad ku heshid King County **ogeysiisyada guri-ka-saarista**, la xiriiir the [Housing Justice Project](#) oo laga helo 206-267-7069 ama iimeel-gareeh [hjpstaff@kcba.org](mailto:hjpstaff@kcba.org). Dalbasha sare awgeed, the **Housing Justice Project hadda kireystayaasha ma ka caawin karto waqti ka horreeya hannaanka guri-ka-saarista**, sida markii la helo ogeysiiska 14-ka bari ah.<sup>1</sup>